

### TUSAALAHA LIISKA NADIIFINTA

Kireeystuhu waa inuu marwalba ka hubiyo kireeyaha ineey hayaan liiska nadaafinta. Hadii uusan kireeyuhu bixinin liiska nadiifinta, tani waa liiska nadiifinta ee loosoojeedinayo kireeystuhu inuu isticmaalo ka hor inta uusan baneeynin guriga.

- Nadiifi gudaha, banaanka, gadaalka iyo hoosta talaagada dhalaali qaboojiyaha/firinjiyeerka
- Fur albaabka talaagada hadii korontada la damiyay
- Nadiifi gudaha, banaanka, gadaalka iyo hoosta cunto kariyaha, nadiifina foornada iyo dhardhaarka cunto kariyaha
- Dhaq gudaha iyo banaanka qaanadaha
- Nadiifi gudaha iyo banaanka daaqadahoo dhan iyo qoladaha/armaajooyinka iyo albaabada deyrarka
- Dhaq darbiyada iyo dhulka guriga
- Masax biraha daahyada, wax yaabaha daaqadaha ku dadan kuna badal kuwaaga kuwa kireeyuhu awal ku xiray
- Masax ama dhaq marawxadaha, daloolada hawada bixiya, nalalkana badal kuwa qarxay
- Fiiri qaac ilaaliyaha, batarigana badan hadii loo baahdo
- Musqusha si fiican unadiifi, sida qeeybta qabeyska, mutuleelka, fadhiga musqusha, muraayada
- Huufarka mari oo nadiifa roogaga hadii loo baahdo

## LIISKA ISKA HUBINTA EE KIREEYSTAHA

### HALKA AAD KIREEYSANAYSO

- Ma leedahay meel aad gashato alaabahaaga qaar sida baaskiilada, boorsooyinka IWM? Yaa halkaan loo ogolyahay inuu isticmaalo?
- Waa halkee halka kuugu dhow ee bas ku istaago?
- Halka aad kireeysanayso ma'udhowdahay meelaha adeega joogtada ah sida dukaamada cuntooyinka laga soo iibsado, bangiga, meelaha jimicsiga lagu sameeyo?
- Halka aad kireeysanayso matahay nadiif? Yaa barafka xaaqaya xiliyada barafku da'o, yaase cowska jaraya? Yaa bixinaya alaabta laisaga xaaqo barafka ama cowska lagu jaro ( Badeelka, mashiinta cowska lagu jaro).
- Xagee lagu baarkimanayaa gaariyaasha? Ileeys fiican maleedahay halka baabuurta lagu baarkimanayo ama banan ha ahaato ama gudaha ee?
- Waa sidee daganaashaha ama sawaxanka halka aad kireeysanayso xiliyada galbihi ah hadii aad damacdo inaad seexato ama wax akhrisato?
- Ma leedahay qasaalad dharka lagu dhaqdo? Ma waqti cayiman ayeey leedahay isticmaalkeedu? Ma qarash ayeey kaa rabtaa isticmaalka mashiinka dhaqmada dharku? Waa xagee dhaqmada kuugu dhow?
- Guriga aad kireeysanayso ma leeyahay internetka komputerku kushaqeeyo, hadii uusan laheeyn ma soo gashan kartaa?

### QARASHAADKA

- Waa imisa kiradu?
- Ma wax qarash ah baa ladhigayaa marka hore? Waa meeqo?
- Kirada ma kujiraan kululeeyaha gurigu, biyo, koronto, fiilada telefisionka ama internetku?
- Qarashka korontada, fiilada telefisionka iyo internetku ma ka baxsan yihiin kirada mise weey kujiraan? Wixii akhbaar dheeraad ah waxaad ka baari kartaa (Daabacaada "Electricity and Natural Gas Contracts" at: [www.servicealberta.ca/644.cfm/#tipsheets](http://www.servicealberta.ca/644.cfm/#tipsheets))
- Qarashka baarkinka gaarigu ma dheeri baa? Waa meeqo?
- Yaa bixinaya qarashka dayactirka wixii guriga ka halaaba-ama ha yaraadaan ama ha weeynaadaan?

### ISKA ILAALI ISFAHAN LA'AANTA QOFKA KULA WADAAGAYA QOLKA

- Yaa saxiixaya waraaqaha heshiiska kirada? Waxaa wanaagsan in lagu sheego/ ama laguxuso shaqsi walba heshiiska kirada
- Maxaa dhacaya hadii shaqsi rabo inuu ka guuro guriga iyadoo xilligii heshiisku dhamaan?
- Sidee loo qeeybsanayaa kirada iyo biilasha kale?
- Sidee khilaafaadka loo xalinayaa?

### SU'AALO IYO TIXGELIN

- Heshiiska kiradu ma illaa waqti cayiman baa mise waa bil-ka-bil?
- Goorma iyo halkee kirada lagu bixinayaa? Maxaa dhacaya hadii kirada lala daaho? Rasiidku waa muhiim markaad qarash bixiso
- Yaad la xiriiraysaa hadii wax dhib ah jiraan?
- Ma diyaarsatay caymiska kireeystaha?
- Mala'ogolyahay inaan sii kireeyo, mala'ogolyahay qof qolka ila daga?
- Mala'ogolyahay inaan xayawaan guriga kuheeysto sida eey ama bisad? Ma qarashbaa laiga rabaa hadii aan xayawaanka guriga ku heeysanayo?
- Ma la'ogolyahay in sigaar lagu cabo?
- Imisaa ayeey ila joogi karaan martidu?
- Ma qurxisan karaa halka aan kireeystay? Waa maxay sharciga uyaal biinanka iyo masaabiirtu gododka eey ku sameeyaan darbiyada marka wax lagu dhadhajiyo (qurxinta oo kale)?
- Goorma iyo halkee akhbaarta lagu soo dhajiyaa marka aan guurayo?
- Goorma ayaa guriga laiga kormeerayaa oo laiga fiirinayaa inta aanan guurin ka hor?
- Hayso nuqul/ koobi waraaqaha daganaashaha guriga oo dhan, oo eey ka mid yihiin waraaqdii heshiiska daganaashaha, warqadii kormeerka/ ama check-gareeynta, iyo rasiidyada

Adeegga Alberta